**Xeerka Guddoomiyaha Sare Kacaanka**

**21 Feberaayo 1970, lamba. 37**

**Meelmarinta Heshiiska dhexmaray  Dawladda Soomaaliya iyo Alitaalia.**

**GUDDOOMIYHA**
**GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu arkay Xaashida Koowaad ee Golaha Saree Kacaanka ee taariikhda 21 Oktoobar 1969;

Marka uu arkay Heshiiska 15 Julaay, 1963 oo lagu meelmariyay D.P.R. lamba. 294 ee 6 Nefembar 1963, oo dhxmaray  Dawladda Soomaaliya iyo Alitaalia kuna saabsanaa dhisidda Somali Ailines lagu faafiyay Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya lamba. 3 illaa ee 11 Nofembar 1963;

Marka uu arkay Dekereetada Golaha Sare Kacaanka ee 26 Oktoobar 1969, taaso lagu baabi'iyay D. P. R. lamba. 24 ee 28 Dicembar 1968, lagu faafiyay Faafinta Rasmiga Suppl. lamba. 2 illaa 3 ee 8 Maarso 1969, kuna saabsan Heshiiska dhex maray Dawladda Soomaaliya iyo Alitalia, laguna meelmariyay D.P.R. ee 6 Nofembar  1963, lamba. 294 laguna faafiyay Faafinta Rasmiga 17 Nofembar 1963;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo wada shaqaynta ka dhexaysa Dawladda Soomaaliya iyo Alitalia – Lineaa Area, Italiana, S. p. A in uu sii socdo muddo dambe oo ay dani ugu jirto Shirkaddaas iyada ah;

Marka uu tixgaliyay Heshiiska ay kala  saxiixdeen 15.2.1970  Dawladda Jamahuuriyadda demoqraadiga Soomaaliya iyo Alitalia uu la jan qaadayo baahida cusub ee dalka;

Marka uu arkay tala soo jeedinta  Wasiirka Isgaarsiinta iyo Gaadiidka;

**WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYA**

**Qod. 1**

Waxaa la meelmariyay oo la fulinayaa laga soo bilaabo taariikhda Dekereetadaan heshiiska 15.2.1970 dhexmaray Dawladda Soomaaliya iyo Alitalia Line Aeree Italiana kaaso lagu baddalay kii hore ee 15 Julaay 1963 oo dhexmaray isla dhinacyadan heshiiskaan galay laguna meelmariyay D. R. P. 6 Nofembar 1963, lamba. 294.

**Qod. 2**

Heshiiska cusub  oo ah qayb ka mida yahay ee Dekereetadaan waxaa lagu faafinayaa Faafinta Rasmikga waxaana lagu biirinayaa  Uruurinta Rasmga ee Xeerarka iyo Dekeretooyinka Jamhuuriyadda Demoqraadoga Soomaaliya .

Muqdisho, 21 Feberaayo 1970.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
**S. Gaas  Maxamed Siyaad Barre**

Wasiirka Hawlaha Guud

**Inj. Maxamed Canshuur Xasan**

**HESHIISKA DHEXMARAY DAWLADDA JAMHUURIYADDA DEMOQARAADIGA SOOMAALIA**

**IYO**

**ALITAALIA S.p. A. Alitaliaya oo ay ka qaybgalayso Shirkadda SomaliAirlines S. p. A**

Heshiiskaa waxaa la galay 15 Feberaayo 1970 wuxuuna dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliya iyo Alitalia – Linee Aerea Italiana – S. p. A. oo xarunteedu tahay Roma, ayna ka wakiil yihiin dhinaca Soomaaliya mudanayaasha: Inj. Maxamed Canshuur Xasan Wasiirka Isgarsiinta iyo Gaadiidka; idhinaca Alitalia – Linee Area Italiana Taliye Guido Fararacci

haystana oggolaasho.

Iyadoo la tixgaliyay:

a) Dawladda Soomaaliya iyadoo doonaysa in ay sii waddo ka faaidaysiga iskaashiga Alitalia, Somali Airlines dhexdeed;
b) In Dawladda Soomaaliya waxay qabtaa in ay u sheegto Alitalia in lala galo Heshiis lagu baddalo kii horay loo galay 15 Julaay 1963;
c) In Alitalia ay diyaar u tahay in ay sii waddo bixinta iskaashiga ay la lahayd Somali Airlines iyo in aqbashay codsiga Dawladda Soomaaliya ee ah in la galo Heshiis oo ku saleysan arrimaha cusub.

Waxaa si wadajira loogu heshiiyay sida soo socota:

**Qod. 1**

Heshiiskaanu waxaa lagu baddalayaa midkii 15 Julaay 1963 ay galay Dawladda Soomaaliya iyo Alitalia.

**Qod. 2**

Ulajeeddada Shirkadda waa in aaaaay qabtaan hawlaha daabulidda gaadiidka circa ee rakaabka, boostada iyo alaabta.

Gaar ahaan Shirkaddu waxay awooddaa in ay:

a) — Soo qaadato, dhisto, ka shaqeyso, iyo, qaadato Ruqsadahaa garoomada dayuuradaha, hangarada, hoosooyinka, dhismayaasha iyo meelaha waxa lagu farsameeyo nooc kasta ha ahaadeene oo loogu talagalay duulimaadka dayuuradaha;
b) — Ay qabtaan hawgallada gargaarka garoomada dayarada iyo diyaariyaan cuntada iyo sharaabka ay iyagu u baahanyahiin ama kuwa shirkado kale;
c) — Abaabulaan iyo qabtaan dhammaan hawlaha sida tooska ama sida aan tooska aan ahayn oo ah qayb ka mida ama ku xiran ulajeddooyin Shirkada kale;
d) — Isku xilsaaraan iyo carbiyaan shaqaalaha fulinaya dhammaan adeegyada Heshiiskaan ku taxan;
e) — Sameeyaan dhammaan hawlgallada iyo qabtaan dhammaan hawlgallada dhaqaalaha , warshadeed iyo maaliyadeed ee si toosa ama sida dadban wax ka taraya wax ku oolnimada horumarinta habasami u socodka Shirkadda.

**Qod. 3**

Shirkaddu waxay leedahay raasamaal ah Sh. Som. 1.600.000 (halmilyan-lixboqolkun) oo u qaybsan 3.200 ( saddexkun-lababoqlokun) oo saami oo halkii saami uu yahay Sh. Som.500 ( shanboqol), oo sidan kala ah:

| | | |
|---|---|---|
| Dawladda Soomaaliya | 51% | (bolkiiba kontan) |
| Alitalia | 49% | (boqolkiiba affartan iyo sagaal) |

Ka qayb qaadashada saamiyada waxay ku koobanyihiin Dawladda Soomaaliya iyo Alitaaliya.

**Qod. 4**

Haddii uu kordho raasamaalku saamiada cusub, si aan dood lahayn waa in loo soo bandhigaa sida ay yihiin qiimaha isla saamiyada si la eg tirada saamiyada mid kasta luu lahaa.

**Qod. 5**

Shirkadda waxaa maamulha Gole Maamul oo ka kooban lix xubnood la soo magacaabay oo kala ah:

a) — Saddex mawaadi soomaaliyeed, oo Dawladda Soomaaliya ay soo magacawdo;
b) — Saddex muwaadin oo talyaaniah, ayna soo magacaawdo Alitalia;

Guddoomiyaha waxaa laga soo dhex xulayaa La-taliyaasha ay soomaalidu soo magacawday iyadoo Gudoomiye Ku-xigeenkana laga soo magacaabayo La-taliyeyaasha Alitalia;

Guddiga Hantidhowrka wuxuu ka koobanyahay lama Hantodhowre oo joogto ah iyo laba Hantidhowre oo keyd ah oo labada Dhinac si si isla eg u soo magacaabaan iyo Guddoomiyaha oo isla Dhinacyada si wadajira u soo xushaan.

Si go'aanka Golaha mid sax u noqdo waxaa loo baahanyahay joogitaanka buuxa iyo codka oo ay isku oggolaadaan aqlabiyadda kala bar xubnaha uu ka koobanyahay.

Hawlsocodsiinta Guddiga Hantidhorka waxaa nidaaminaya xeerka.

**Qod. 6**

Ansaxnaanta go'aamada Shirka Caadiga, ha ahaado kulanka koowaad ama kan labaad, waxaa loo baahanyahay in oggolaadaan ugu yaraan kala bar iyo hal dheeraada raasamaalka cidda leh.

Shirka aan caadiga ahayn, ha ahaado midka koobaad ama kan labaad waxay ku go'aaminyaan oggolaashaha codka ugu yaraan saddex meelood shan raasamaalka cidda leh, haddii xeerku aan sheegeyn aqlabiyad intaas ka badan.

**Qod. 7**

Dawladda Soomaaliya waxay isku xilsaaraysaa in ay siiso Shirkadda xuquuqda gooni gaar haaneed ee dhammaan xuquuqda adeegyada gudaha iyo kuwa caalamiga, ha ahaato mid khadka iyo sidoo kale kuwa codsiga (Charter) calanka soomaaliyeed, iyo inay kala xaajooto xuquuqda Dalalka Qalaad si loo ilaaliyo danaha Shirkadda iyada ah.

**Qod. 8**

Dawladdu waxay ka dhaafaysaa Shirkadda bixinta canshuuraha nooc kasta oo kastan, xuquuqda canshuurta ku waajibay waxyaabaha dayuuradaha lagu soo dhoofiyo, qalabka daayictirka guud ahaan, qalabka iyo agabka loogu talagalay qaybaha farsamada iyo hawlgalka (duulimaadka circa), sidoo kale shidaalka iyo xayraha.

Waxay kaloo ballan qaadaysaa:

a) isticmaalka lacag la'aanta e xiriirinta raadyaha, raadyaha kaalmaha gooshidda iyo adegyada saadasha hawada, ha ahaadeen kuwa hadda jira iyo mustaqbalka la rakibi doono;
b) isticmaalka lacag la'aaneed e garoomada dayuuradaha goobaha lagu badbaadi karo ee Dalka soomaalida ka jira;
c) soo helidda lacag la'aanta ah e dayuuradaha ee qalabka daayactirka iyo agab kasta ee looga baahanyahay hawlaha Shirkadda meelaha kor lagu soo sheegay;
d) isticmaalka lacag la'aaned, markasta garoomada dayuuradaha iyo goobaha kor lagu soo sheegay, goobaha ay Shirkaddu u baahantahay in ay ka dhisto, hoosooyin, xaafisyo iyo guud ahaan saldhigyo dayuuradeed.

**Qod. 9**

Hoggaaminta Shirkadda waxaa loo xilsaaray muwaadiniinta soomaalida laga bilaabo 1 Janaayo 1970.

**Qod. 10**

Alitaaliya waxay isku xilsaaraysaa in ay bixiso marka ay weydiistaan Hoggaanka Somali Airlines wixii awoodddeda aha, shaqaalaha maamulka khuburada iyo farsamayaqaanno iyado Somali Airlines ay soo celinayso dhammaan kharashaadka ay cinwaankaas Alitaalia ku gashay

Isla shuruudaas waxay samaynaysaa tababarka shaqaalaha soomaalida kolba loo oo diro Xarunta Tababarka Fiumicino amase xarumo kale oo ka mida Xaafiisyadeeda.

**Qod. 11**

Haddii ay dhacdo khasaare xagga maareynta, Alitaaliya waxay isku xilsaaraysaa in ay daboosho illaa lacagbdhan Sh. So. 2.300.000 (labamilyan-saddexboqolokun) sanad kasta ee hawlgal oo ka bilaabata 1 Janaayo 1970. Khasaaraha intaas ka badan waxa qaabilaya saamilayda iyado lagu salaynayo ka qaybgalka raasamaalkooda.

Haddii faai'iido la helo, waxaa lagu biirinayaa raasamaalka.

**Qod. 12**

Marka ay dhammaato muddada labada sano oo ka bilaabata taariikhda 1 Janaayo 1970, Alitalia waay iqtiyaar u leedahay in ay ka baxdo Shirkadda, iyadoo digniin lix bilooda keenaysa. Dawladda soomaalida waxay u ballan qaadaysa Alitalia munaasabadaas bixinta lacag caddaana oo la eg qiimaha uu leeyahay saamiyada oo lagu saleeyo hawlgalada ka muuqda miisaaniyaddii ugu dambaysay ee la oggoladay iyo iyado sikastaba aana ka yareyn qiimaha uu ku magcabanyahay.

Dawladda soomaalida iyaduna, marka ay ka soo wareegto laba sano taariikhda kor lagu soo sheegay ee 1 Janaayo 1970 ka dib marka ay keento digniin lix bilood ah, waxay iqtiyaar u

leedahay in qadato qaybta saamiyada Alitalia isla shuruudaha kor ku qoran. Dawladda soomaalida waxay kalo isku xilsaaraysaa in ay ballan qaaddo in si xora ugu wareejiso Alitalia lacagaha saamiya iyo lacagaha kale ee ay Shirkaddu ku leedahay ama Alitalia ay Dawladda soomaalida ku leedahay oo ay sababeen fulinta Heshiiskaan iyo maaraynta Shirkadda.

**Qod. 13**

Wixii khilaafa eek a dhasha labada Dhinac ee Heshiiskaan galay waxaa la horgeynayaa guddi dhex-dhexadin (sulux) oo ka kooban saddex xubnood oo sida soo socota loo magacaabo:

a) — mid ay magacawdo Daladda soomaalida;
b) — Mid ay magacawdo Alitalia;
c) — Guddoomiyaha Guddiga oo si wada jira ku heshiiyaan laba xubnood, haddii aay isku khilaafaan waxaa noqonaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya.

Guddiga Dhexdhexadinta waxay ku kulmayaan goobta uu doorto Guddoomiyaha waxayna wax ku go'aaminayaan aqlabiyad.

Go'aanka Guddiga Dhex-dhexaadinta waxaa loo aqbalaya si kama dambaysa, iyado kharashka la galayna la saarayo dhinaca laga gar helay.

**Qod. 14**

Wax ka baddalka Xeerka Shirkadda waxaa lagu samaynayaa si waafaqsan shuruudaha Heshiiskaan, marka loo baahdo.

**Qod. 15**

Heshiiskaan wuxuu soconayaa muddo 4 (affar) sano ah, waana la cusboonaysiin kara, marka laga reebo iqtiyaarka lagu sheegay qod. 12 ee la soo sheegay.

Wuxuu lagu sameeyay Muqdisho 15 Feberaayo 1970 isago ah laba nuqul oo ah afka Talyaaniga, iyadoo labaduba si isla mida yihiin run.

| Alitaalia waxaa u saxiixay | Dawladda Soomaalia waxaa u saxiixay |
|---|---|
| **Guido Fararacci** | **Inj. Maxamed Canshuur** |